23. Annagaa Quraanka Nabiyow kugu soo Dajinnay.

إِنَّا نَحْنُ نَزَّلْنَا عَلَيْكَ ٱلْقُرْءَانَ تَنزِيلًا ﴿٢٣﴾

24. Ee ku Samir Xukunka Eebe, hana Maqlin Dambiile iyo Gaalnima Badane (warkiis).

فَٱصْبِرْ لِحُكْمِ رَبِّكَ وَلَا تُطِعْ مِنْهُمْ ءَاثِمًا أَوْ كَفُورًا ﴿٢٤﴾

25. Xus magaca Eebe subax iyo Galabba.

وَٱذْكُرِ ٱسْمَ رَبِّكَ بُكْرَةً وَأَصِيلًا ﴿٢٥﴾

26. Habeenkana Eebe u sujuud, una tasbiixso Habeenkii (u tuko) waqti Dheer.

وَمِنَ ٱلَّيْلِ فَٱسْجُدْ لَهُۥ وَسَبِّحْهُ لَيْلًا طَوِيلًا ﴿٢٦﴾

27. Kuwaasi waxay Jecelyihiin tan soo Dagdagaysa (Adduunyada) waxay kaga Tagayaan Gadaashoodana Maalin Culus (Qiaamada).

إِنَّ هَٰٓؤُلَآءِ يُحِبُّونَ ٱلْعَاجِلَةَ وَيَذَرُونَ وَرَآءَهُمْ
يَوْمًا ثَقِيلًا ﴿٢٧﴾

28. Annagaa Abuurray Dadka, Adkaynayna xubnohooda, Haddaan Doonnana waxaan ku Baddalaynaa kuwa la mid ah.

نَّحْنُ خَلَقْنَٰهُمْ وَشَدَدْنَآ أَسْرَهُمْ ۖ وَإِذَا شِئْنَا
بَدَّلْنَآ أَمْثَٰلَهُمْ تَبْدِيلًا ﴿٢٨﴾

29. Suuraddani waa waano, Ee Ruuxii Doona ha ka yeesho Eebe Xaggiisa waddo.

إِنَّ هَٰذِهِۦ تَذْكِرَةٌ ۖ فَمَن شَآءَ ٱتَّخَذَ إِلَىٰ رَبِّهِۦ
سَبِيلًا ﴿٢٩﴾

30. Waxna ma dooni kartaan in Eebe doona mooyee, Eebana waa wax walba oge falsan.

وَمَا تَشَآءُونَ إِلَّآ أَن يَشَآءَ ٱللَّهُ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ
عَلِيمًا حَكِيمًا ﴿٣٠﴾

31. Wuxuu galiyaa naxariistiisa ruuxuu doono, daalimiintana wuxuu u darbay cadaab daran.

يُدْخِلُ مَن يَشَآءُ فِى رَحْمَتِهِۦ ۚ وَٱلظَّٰلِمِينَ أَعَدَّ لَهُمْ
عَذَابًا أَلِيمًا ﴿٣١﴾

Jannada waxaa ku sugan waxaan ilu arag isagoo kale dhagna maqal qalbina ku soo dhici karin, waase in Eebaha Quraanka soo dajiyay la adeeco, dhibkana loo adkaysto, xumaanle warkiisana aan la maqal, adduunyana aan aakhara laga doorannin, si aan Naxariista Eebe u hello. Al-Insaan (20-31).

## Suurat Al-Mursalaat

## سُورَةُ المُرْسَلَاتِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaan ku dhaartay Dabaysha wanaaga lala Diro.

وَٱلْمُرْسَلَٰتِ عُرْفًا ﴿١﴾

2. iyo Dabaysha sida daran u dhabata.

فَٱلۡعَٰصِفَٰتِ عَصۡفٗا ﴿٢﴾

3. Iyo Dabaysha roobka kicisa.

وَٱلنَّٰشِرَٰتِ نَشۡرٗا ﴿٣﴾

4. Iyo malaa’igta Xaqa iyo Baadilka kala Bixisa.

فَٱلۡفَٰرِقَٰتِ فَرۡقٗا ﴿٤﴾

5. iyo malaa’igta waxyiga soo Dajisa.

فَٱلۡمُلۡقِيَٰتِ ذِكۡرًا ﴿٥﴾

6. Si Dadka loo waaniyo looguna digo.

عُذۡرًا أَوۡ نُذۡرًا ﴿٦﴾

7. Ee waxa dadow Eebe ku Yaboohay wuu dhici.

إِنَّمَا تُوعَدُونَ لَوَٰقِعٞ ﴿٧﴾

8. Markase xiddiguhu Nuurku ka tago.

فَإِذَا ٱلنُّجُومُ طُمِسَتۡ ﴿٨﴾

9. Oo samadu Dildillaacdo.

وَإِذَا ٱلسَّمَآءُ فُرِجَتۡ ﴿٩﴾

10. Oo Buuraha la Rujiyo.

وَإِذَا ٱلۡجِبَالُ نُسِفَتۡ ﴿١٠﴾

11. Oo Rasuulladii la kulmiyo (iyo Dadkoodii).

وَإِذَا ٱلرُّسُلُ أُقِّتَتۡ ﴿١١﴾

12. Maalin wayn oo loo Qabtay Darteed.

لِأَيِّ يَوۡمٍ أُجِّلَتۡ ﴿١٢﴾

13. In dadka la kala Bixiyo Dartiis.

لِيَوۡمِ ٱلۡفَصۡلِ ﴿١٣﴾

14. Maalinta kala Bixinta ma Taqaannaa.

وَمَآ أَدۡرَىٰكَ مَا يَوۡمُ ٱلۡفَصۡلِ ﴿١٤﴾

15. Halaag wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay.

وَيۡلٞ يَوۡمَئِذٖ لِّلۡمُكَذِّبِينَ ﴿١٥﴾

Eebe wuxuu rabuu ku dhaartaa oo ka mid ah Khalqigiisa, halkanna wuxuu ku dhaartay shan arrimood in waxa lugu dhaaran ay shakila’aan tahay inuu dhici, kaasoo ah abaal-marinta qiyaame, waxaana ka horrayn waxyaalo waawayn sida xiddigahoo madoobaada, Cirkoo duleeshama iyo Buurahoo burbura, maalintaasna waxaa la kulmin rasuulladii iyo ummadohoodii.
Mujaahidna wuxuu Yidhi: waa maalinta la soo kulmin Rasuullada si ay ugu marag kacaan ummadohoodii. Al-Mursalaat (1-15).

---

16. Miyaannaan Halaagin Ummadihii hore.

أَلَمۡ نُهۡلِكِ ٱلۡأَوَّلِينَ ﴿١٦﴾

17. Haddana Aannaan Raacinhaynin kuwii Dambe.

ثُمَّ نُتۡبِعُهُمُ ٱلۡأٓخِرِينَ ﴿١٧﴾

| | |
|---|---|
| 18. Saasaana ku Falaynaa Dambiilayaasha. | كَذَٰلِكَ نَفْعَلُ بِٱلْمُجْرِمِينَ ١٨ |
| 19. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniya. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ١٩ |
| 20. Miyaannaan Idinka Abuurin biyo tabar yar. | أَلَمْ نَخْلُقكُّم مِّن مَّآءٍ مَّهِينٍ ٢٠ |
| 21. Markaasna yeellay meel ilaashan. | فَجَعَلْنَٰهُ فِى قَرَارٍ مَّكِينٍ ٢١ |
| 22. Tan iyo Muddo la yaqaanno. | إِلَىٰ قَدَرٍ مَّعْلُومٍ ٢٢ |
| 23. Annagaa wax Qaddarray, wax Qaddarana u Fiican. | فَقَدَرْنَا فَنِعْمَ ٱلْقَٰدِرُونَ ٢٣ |
| 24. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniya. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ٢٤ |
| 25. Miyaanaan ka yeelin Dhulka kafaalaqaade. | أَلَمْ نَجْعَلِ ٱلْأَرْضَ كِفَاتًا ٢٥ |
| 26. Nolol iyo Geeriba. | أَحْيَآءً وَأَمْوَٰتًا ٢٦ |
| 27. Waxaana yeellay Dhulka Dhexdiisa buuro sugan oo waawayn, waxaana idinka Waraabinnay biyo macaan. | وَجَعَلْنَا فِيهَا رَوَٰسِىَ شَٰمِخَٰتٍ وَأَسْقَيْنَٰكُم مَّآءً فُرَاتًا ٢٧ |
| 28. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ٢٨ |

Eebe wuxuu inooga digay wixii ku dhacay ummadihii hore, isagoo ina xusuusin waxa laynaga abuuray iyo siduu noo abuuray, iyo siduu dhulka inoogu sahlay looguna dulnoolaan'looguna dhiman, buurana ugu sugay biyo macaanna inooga waraabiyay.
Culimada Quraanka fasirtayna waxay dheheen: Eebe wuxuu ku celceliyay suuraddan (Halaag wuxuu u sugnaaday kuwa xaqa beeniyay) Toban jeer si loo badiyo doonidda iyo cabsida. Al-Mursalaat (16-28).

---

| | |
|---|---|
| 29. Aada gaalooy cadaabkii xaggiisa aad Beenin Jirteen. | ٱنطَلِقُوٓا۟ إِلَىٰ مَا كُنتُم بِهِۦ تُكَذِّبُونَ ٢٩ |
| 30. Aada hoos (Qiiqa naarta) oo saddex madax ah. | ٱنطَلِقُوٓا۟ إِلَىٰ ظِلٍّ ذِى ثَلَٰثِ شُعَبٍ ٣٠ |
| 31. Oon hoosinayn, ololla (Kulaylna) wax ka tarayn. | لَّا ظَلِيلٍ وَلَا يُغْنِى مِنَ ٱللَّهَبِ ٣١ |
| 32. Waxayna Naartu tuuri Dhimbilo daran ood Mooddo daar. | إِنَّهَا تَرْمِى بِشَرَرٍ كَٱلْقَصْرِ ٣٢ |
| 33. Ama aad Mooddo geel madaw ah. | كَأَنَّهُۥ جِمَٰلَتٌ صُفْرٌ ٣٣ |

| | |
|---|---|
| 34. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٣٤﴾ |
| 35. Taasina waa maalin aynan hadlaynin Dadku. | هَٰذَا يَوْمُ لَا يَنطِقُونَ ﴿٣٥﴾ |
| 36. Lamana idmo si Ay u cudurdaartaan. | وَلَا يُؤْذَنُ لَهُمْ فَيَعْتَذِرُونَ ﴿٣٦﴾ |
| 37. Halaagna wuxuu u sugnaaday maalintaas kuwa xaqa Beeniyay. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٣٧﴾ |
| 38. Maalintan waa maalintii kala Bixinta, Waana idin kulminnay idinka iyo kuwii Horreeyayba. | هَٰذَا يَوْمُ الْفَصْلِ ۖ جَمَعْنَاكُمْ وَالْأَوَّلِينَ ﴿٣٨﴾ |
| 39. Ee Haddaad wax Dhagrikartaan i Dhagra. | فَإِن كَانَ لَكُمْ كَيْدٌ فَكِيدُونِ ﴿٣٩﴾ |
| 40. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٠﴾ |

Eebe cidna ma dulmiyo Qiyaamana waxaa lagu abaalmarin xaq-diidayaasha caddibaad daran, iyadoon cidna hadli karin ruux Eebe idma mooyeen, iyadoo dadkoo dhan la kulmin.
Dhabarina wuxuu yidhi: hooska naartu kulaylkeedana kama hadheeyo, ololkeedana kama dugsiiyo. Al-Mursalaat (29-40).

---

| | |
|---|---|
| 41. Kuwa Eebe ka Dhawrsada waxay ku sugnaan hoos iyo ilo; | إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي ظِلَالٍ وَعُيُونٍ ﴿٤١﴾ |
| 42. (Waxayna Cuni) khudaartay Doonaan. | وَفَوَاكِهَ مِمَّا يَشْتَهُونَ ﴿٤٢﴾ |
| 43. Waxaana Lagu dhihi Cuna oo cabba Idinkoo shifaysan Camalkiinnii Dartiis. | كُلُوا وَاشْرَبُوا هَنِيئًا بِمَا كُنتُمْ تَعْمَلُونَ ﴿٤٣﴾ |
| 44. Sasaana ku abaalMarinaynaa kuwa wanaagga fala. | إِنَّا كَذَٰلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ ﴿٤٤﴾ |
| 45. Halaagna wuxuu u Sugnaaday kuwa xaqa Beeniya. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٥﴾ |
| 46. (Gaalada waxaa lagu Dhihi) Cuna oo Raaxaysta wax yar, waxaad tihiin Dambiilayaale; | كُلُوا وَتَمَتَّعُوا قَلِيلًا إِنَّكُم مُّجْرِمُونَ ﴿٤٦﴾ |
| 47. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniyay. | وَيْلٌ يَوْمَئِذٍ لِّلْمُكَذِّبِينَ ﴿٤٧﴾ |
| 48. Markii la yidhaahdo Gaalada tukada ma tukadaan. | وَإِذَا قِيلَ لَهُمُ ارْكَعُوا لَا يَرْكَعُونَ ﴿٤٨﴾ |

49. Halaagna wuxuu u sugnaaday Maalintaas kuwa xaqa Beeniya.

وَيۡلٞ يَوۡمَئِذٖ لِّلۡمُكَذِّبِينَ ٤٩

50. Hadalkeebay Quraanka Dabadiis Rumaynhayaan.

فَبِأَيِّ حَدِيثِۭ بَعۡدَهُۥ يُؤۡمِنُونَ ٥٠

Ruux walba wuxuu la kulmi wuxuu hormarsaday, wuxuuna goosan midhuhuu abuurtay, Mu'miniintuna waxay ku sugnaan Maalintaas Qiyaame hoos, iyo biyo dureeri, iyo nicmo badan, siday gaaladuba ugu sugantahay Naar daran iyo oon iyo kadeedba, maxaa yeelay wanaagoodii adduunyadii bay ku soo hormarsadeen, waxaase la yaable oo iswaydiis leh ruuxii Quraankan rumaynwaaya waxa kalees rumayn. Muqaatil wuxuu sheegay: inay ku soo dagtay aayadda (Haddii loo yidhaahdo tukada ma tukadaan) Ree-Thaqiif, oo Nabiga ka codsaday in salaadda laga daayo, Nabiguna uu diiday naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee oo uu yidhi: Khayr ma leh diin aan salaad lahayn. taasina waxay ku tusin Salaadda iyo Islaamnimadu inay isku xidhanyihiin. Al-Mursalaat (41-50).

# Suurat An-Naba' سُورَةُ النَّبَإِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Maxay iska waydiinayaan (Gaaladu).

عَمَّ يَتَسَآءَلُونَ ١

2. Warkii waynaa xaggiisa (Qiyaamada ama Quraanka).

عَنِ ٱلنَّبَإِ ٱلۡعَظِيمِ ٢

3. Ay isku diiddanaayeen.

ٱلَّذِي هُمۡ فِيهِ مُخۡتَلِفُونَ ٣

4. Saas ma aha ee way ogaan donaan.

كَلَّا سَيَعۡلَمُونَ ٤

5. Haddana way ogaandoonaan (waxa ku dhaca).

ثُمَّ كَلَّا سَيَعۡلَمُونَ ٥

6. Miyaannaan Dhulka gogol ka yeelin.

أَلَمۡ نَجۡعَلِ ٱلۡأَرۡضَ مِهَٰدٗا ٦

7. Buurahana Rukummo (ka yeelin).

وَٱلۡجِبَالَ أَوۡتَادٗا ٧

8. Miyannaan idinka Abuurina Noocyo.

وَخَلَقۡنَٰكُمۡ أَزۡوَٰجٗا ٨

9. Miyaannaan Hurdada Raaxo idiinka dhigin.

وَجَعَلۡنَا نَوۡمَكُمۡ سُبَاتٗا ٩

10. Miyaannaan Habeenka asturaal idiinka dhigin.

وَجَعَلۡنَا ٱلَّيۡلَ لِبَاسٗا ١٠